



PPS oo wanaajinaysa caafimaadka ardayga, iyada oo caawimaad laga helayo dad la kaashanayo iyo deeq lacageed

Intii lagu jiray sanadkii la soo dhaafay waxaa jiray hawlo badan oo kala duwan oo la xiriiray wanaajinta caafimaadka ardayda iyo faqo-qabka ee Dugsiyada Dadweynaha Portland. Iyada oo taageeradooda ay lahaayeen dad iskaashi lala leeyahay taasi oo keentay in PPS ay hesho deeq lacageed oo dhan qiyaastii \$3 milyan, kooxda Adeegyada Waxbarashada Caafimaadka iyo Taageerada Ardayda ayaa awooday in ay barnaamij casri ah iyo shaqaale cusub ku soo kordhiyaan dadaalada waxbarashada caafimaadka ee ee PPS.

“PPS ayaa hoggaanka u haysa waxbarashada caafimaadka ee gobolka iyo dalka,” ayay sheegtay Dr. Jenny Withycombe, Maamulaha Barnaamijka Waxbarasho ee loogu talagalay Waxbarashada Caafimaadka iyo Jirka. “Waxaan ognahay in sida ugu fiican ee wax looga beddelo dhaqanku yahay dhallinyaradeena iyo ka hortagga, waanan buuxinaynaa iyada oo heerar kasta ah.”

Laga soo bilaabo 2018-19, dhammaan ardayda K-5 waxay helayaan afar cutub oo ah caafimaadka waxbarashada, iyada oo ardayda dugsiyada dhexe looga baahan yahay in ay qaataan ugu yaraan hal qayb oo ah caafimaadka. Ardayda dugsiga sare ayaa sii wada in ay dhammeystaan laba simistar oo ah waxbarashada caafimaadka oo u dhaxaysa fasallada 9-12. Iyada oo dhammaan ardayda PPS ay hadda helaan waxbarasho ku saabsan xiriirada caafimaadka leh ama aan caafimaad lahayn.

Deeqda lacageed ee PPS ay heshay waxay ka caawinayaan dadaaladani:

Waxbarashada dhanka galmaada ee dhammeystiran: PPS waxay deeq lacageed oo dhan \$1.7 milyan ka heshay Xarumaha la Dagaalanka iyo ka Hortagga Cudurka si muddo shan sano loogu isticmaalo mashruuca “Horumarinta Fayo-qabka Dhallinyarada ee Dugsiyada”, oo sidoo kale loo yaqaan “SAY Wellness.” Mashruuca, kaasi oo dhammeysanaya sanadkiisii ugu horreeyay PPS, ayaa macallinka caafimaadka ee dugsiga dhexe iyo dugsi sare oo kasta siiyay tababarka waxbarashada dhanka galmaada, ka hortagga rabshada, samaynta jawi ammaan ah, wax taageeraya isla markaana dhiirigelin u leh ardayda, oo ay ku jiraan dhallinyarada+ LGBTQ:

“Waxaan ka tagay aniga oo og sida dadka waxbaranayaa u kobcaan isla markaana horumar u sameeyaan, iyada loo aqoonsanayo in qaababka waxa loo barto iyo hab-dhaqanku ay kala duwan yihiin marka la eego dhinacyada garashada, bulsho, dareen iyo jireed,” ayuu sheegay macallinka caafimaadka ee dugsiga sare.

Taageerooyinka daroogada iyo aalkolada: Regence, iyada oo la adeegsanayo qaybta shirkadda caymiska caafimaadka ee mas'uuliyadda bulsho, waxay deeq lacageed oo dhan \$40,000 siisay qorshaha [REAHL \(Waxbarashada Ka soo kabashada iyo Tallaabada loogu talagalay Caafimaad Ku noolaanshaha\)](#), kaasi oo taageera ka hortagga isticmaalka mukhaadaraadka. Qorshaha, oo la bilaabay Noofambar wuxuu isticmaalaa dhacdooyinka la xiriira ardayda iyo qoysaska kala duwan, kooxo wax falanqeeya iyo abuurista ilo loogu talagalay la taliyayaasha iyo shaqaalaha kale ee dugsiga.

“Waan ku faraxsanahay in aan awoodno in aanu sii xoojino wada shaqeynta aan la leenahay hawl-wadaagayaasheena degaanka jooga ee qabashada shaqadan qiimaha leh,” ayay sheegtay Brenda Martinek, Maamulaha Adeegyada Taageerada Ardayda ee PPS.

Waxbarashada caafimaadka K-5: Bishii Abriil, PPS waxay deeq lacageed oo dhan \$833,000 ka heshay Maamulka Caafimaadka Oregon taasi oo degmada ka caawin doonta kordhinta in ay aasaaska u dhigto caafimaad iyada oo laga bilaabayo arday gaartay da'ada dugsiga hoose lagu aado. Deeqda lacageed waxaa lagu maalgelin doonaa qorshaha “Health for K-5” kaasi oo macallimiinta lagu tababari doono in ay isticmaalaan xirfaddo-ku saleysan waxbarashada caafimaadka iyo isku darka manhajka, iyada oo dugsi kasta oo PPS ka tirsan oo leh ardayda K-5 laga abuuri doono isla markaana la tababari doono laba ah hoggaamiyayaasha waxbarashada caafimaadka, iyo sidoo kale macallimiinta daneynaysa ee ku kala baahsan gobolka.

Qorshaha “Health for K-5” wuxuu PPS ka caawin doonaa in ay gaarto hadafyadeeda dhiirigelinta hab-dhaqanka caafimaadka iyo ka hortagga isticmaalka mukhaadaraadka iyada oo la gaarayo kumanaan arday iyo qoysas ah ee guud ahaan Oregon,” ayay sheegtay Withycombe.

--*Tullan Spitz*